



qofka ka taga salaadda casar camalkiisu wuu buray)

Buraydata Binu-xuseyn-Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: U dhakhsada salaadda casar, waayo Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiiye-wuxuu yiri: (qofka ka taga salaadda casar camalkiisu wuu buray).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiiye- wuxuu ka digay in salaadda casar waqtigeeda dib looga dhigo, si bareer ah qofka sidaa sameeyana camalkiisu wuu buraayo oo wax kasoo qaad ma leh.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/6261>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

